

KU DHAQAN XAFIIS D.



Faafin Rasmi ah

EE JUMHURIYADDA DIMUQRADIIKA SOMALIYA

Sanadka 1

Moqdisho ah 20kii Majio 1973

L. 7

Laanta Maamulka Faafinta Rasmiga ah
ee ka tirsan Madaxtooyada Golaha Sare ee Kacaanka

FAAFIN BIL SOO BAXA

QIIMADU: waa 5 shilin lambar waliba — **RUKUNKA:** Sanadii waa Sh. 100 Samaliya gudeheeda — dibaddedana waa Shs. 300. Rukunka la weydiisto waqtiga loo gooyay wuxuu ka bilabmaa 1 Janayo. Qiimaha qoritaanku F. R. halkii sadar iyo waxii ka yar waa 2 laba shilin — Rukunka iyo qoritaanku waxaa la weydiistaa Laanta Maamulka Faafinta Rasmiga ah — Lacagta waxaa lagu bixinaya Xafiiska Canshuraha ee Wasaaradda Lacagta

KOOBNIIN

BOGGA KOOWAAD

SHARCIYO

W.M.

BOGGA LABAAD

XEER DOWLADEED

- XEER GUDDOONSHAHA GOLAHA SARE EE KA-
CAANKA, 25 Aprile 1973 — *Magacaau Guddoomi-*
yeyaal Gobollo. L. 47. Bog. 94
- XEER GUDDOONSHAHA GOLAHA SARE EE KA-
CAANKA, 25 Aprile 1973 — *Magacaau Guddomi-*
yeyaal Degmooyin. L. 48. » 95
- XEER GUDDOONSHAHA GOLAHA SARE EE KA-
CAANKA, 26 Aprile 1973 — *Saraakiil Shaqada ka*
Fadhistay. L. 49. » 97
- XEER GUDDOONSHAHA GOLAHA SARE EE KA-
CAANKA, 3 Maggio 1973 — *Xidhmo dhireed oo joogta*
ah. L. 50. » 98
- XEER WASAARADA GARSOORKA IYO DIINTA, 26
Aprile 1973 — *Magacaabid (Asasoorayaasha) Maxka-*
madda Corte Assise ee Dowladda Gobolka Waqooyi
Bari Burco, Sannadkan 1973. L. 51. » 99

BOGGA SEDDEXAAD

TALOOPYIN, ISGARSIIN, OGEYSIIS, IYO WAXII LA MID AH

- WASAARADDA HAWLAHA GUUD, 7 Maggio 1973 —
Naada Dhul Jaalle Cali Xaji Nur iyo Moxamed Xaji Nur. L. 53. Bog. 101
- WASAARADDA HAWLAHA GUUD, 7 Maggio 1973 —
Naada Dhul Jaalle Cabduraxman Cusman Axmed L. 54. » 102
- WASAARADDA HAWLAHA GUUD, 10 Maggio 1973 —
Naada Dhul Jaalle Sahara Muse Aden. L. 55. » 103
- WASAARADDA HAWLAHA GUUD, 10 Maggio 1973 —
Baddalaad Naado Dhul Jaalle Moxamed Cumar Mohidin. L. 56. » 103
- DEGMADA BARDHERE, 20 Febraio 1973 — *Naado ku saabsan Dhul Jaalle Carta Maxamed Aden. L. 57.* » 104

BOGGA KOOWAAD

SHARCIYO

W.M.

BOGGA LABAAD

XEER DOWLADEED

GUDDOONSHAHA GOLAHA SARE EE KACAANKA

25 Aprile 1973, L. 47.

Magacaau Guddomiyeyaal Gobollo.

GUDDOONSHAHA

GOLAHA SARE EE KACAANKA

ASAGOO ARKAY Xaashidii 1d iyo tii 2d ee Kacaanka 21 Okto-
bar 1969;

ASAGOO ARKAY Qodobka toddobaat ee Xeerka lambarkiiisu
yahay 52 soona baxay sideedii jun 1972kii;

ASAGOO TIXGELINAYA Tilmaantii Xoghayaha Wasaaradda
Arrimaha Gudaha;

ASAGOO OGAADAY Baahida loo qabo in loo magacaabo Gud-
doomiyeyaal Gobolka Hargeysa iyo Gobolka Galkacyo,

WUXUU GOOYAY

Qodobka 1

In Gaashaanle Cise Tarambi Mumin uu Gudoomiye ka naqdo Gobolka Hargeysaa, Gaashaanle Farax Cawale Yusuf-na Guddoomiye ku meelgaar ah ka noqdo Gobolka Galkacyo.

Qodobka 2

Go'aankanu waxuu u dhaqan golaya si degdeg ah waana in lagu qoro Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda.

Muqdisho, 5 Aprile 1973.

GUDDOOMIYAHA GOLAHA SARE EEEos

GUDDOOMIYAHA
GOLAHA SARE EE KACAANKA
S. Gaas Maxamed Siyad Barre

Xoghayaha Dawladda ee Arrimaha Gudaha
Kusime Sareeye Gaas Maxamed Siyad Barre

GUDDOONSHAHA GOLAHA SARE EE KACAANKA

25 Aprile 1973, L. 48.

Magacaau Guddomiyeyaal Degmooyin.

GUDDOONSHAHA

GOLAHA SARE EE KACAANKA

ASAGOO ARKAY Xaashidii 1d iyo tii 2d ee Kacaanka 21 Oktobar 1969;

ASAGOO ARKAY⁷ Godobka tobnsad iyo kan labiyotobnaad ee Xeerka lambarkiisu yahay 52 soona baxay sideedii jun 1972kii;

ASAGOO TIXGELINAYA Tilmaantii Xoghayaha Wasaaradda Arrimaha Gudaha;

ASAGOO OGAADAY Baahida loo qobo in loo magacaabo Guddomiyeyaal Degmooyinka Jilib, Kismayo, Galkacyo, Xarardhere, Jariiban, Bardhere, Hargeysa, Dolo iyo Yed.

WUXUU GOOYAY

Qodobka 1

In saraakiisha hoos ku qoran loo nagacaabay in ay ka noqdaan Guddoomiyeyaal Degmooyinka, kor lagu soo sheegay ayadoo sarkal walba magaciisa lagu dhinac qoray Dogmada uu ka noqonaayo Guddoomiye:

1. — Gaashaanle Cali Xaji M. Afrax — Guddoomiyaha Dogmada Jilib;
2. — Gaashaanle Ibrahim Cabid Nur — Guddoomiyaha Degmada Kisimayo;
3. — Dhamme Xusen Nur Farax — Guddoomiyaha Degmada Galkacyo;
4. — Dhamme Muse Ismacil Garrale — Guddoomiyaha Degmada Xarardhere;
5. — Laba Xidigle Cumar Warsame Ducale — Guddoomiyaha Degmada Jariban;
6. — Laba Xidigle Axmed Cali Yusuf — Guddoomiyaha Degmada Bardhere;
7. — Laba Xidigle Maxamed Yusuf Axmed — Guddoomiyaha Degmada Hargeysa;
8. — Dhamme Maxamed Jelle Cawale — Guddoomiyaha Degmada Dolo;
9. — Laba Xidigle Cabdurahman Axmed Xusen — Guddoomiyaha Degmada Yed.

Qodobka 2

Go'aankanu wuxuu dhaqan gelaya si degdeg ah waana in lagu qoro Faafinta Rasmiga ah ee Dowladda.

Muqdisho, 25 Aprile 1973.

GUDDOMIYAHA
GOLAHA SARE EE KACAANKA
S. Gaas Maxamed Siyad Barre

Xoghayaha Dawladda ee Arrimaha Gudaha
Kusimaha Sareeya Maxamed Siyad Barre

VISTO e registrato - Reg. n. 2, foglio n. 34.
Mogadiscio, 30 Aprile 1973.
Il Magistrato ai Cotni:
Magg. ABDULLAHI WARSAME NUR

GUDDOONSHAHA GOLAHA SARE EE KACAANKA

26 Aprile 1973, L. 49.

Saraakiil shaqada ka Fadhiistay,

**GUDDOONSHAHA
GOLAHA SARE EE KACAANKA**

ISAGGO ARKAY Xaashidii kowaad iyo tii labaad ee Kacaanka iyo Qaynuunkii kowaad ee 21kii Oktoobar 1969;

ISAGOO ARKAY Qodobka 19aad xarfaha (a) iyo (b) iyo Qodobka 32aad ee Qaynuunkii lam. 2 ee 4-1-1973 kuna xiriirsan sharciga lam. 2 ee 23-12-1972 ee Dhismaha Ciidanka Boliska;

ISAGOO ARKAY Qodobka 9aad iyo 12aad ee sharciga lam. 6 ee 31-12-1969 ee ku saabsan xaqa iyo abaalgudka Ciidamada Salabka Sida (Pension and Gratuity).

ISAGOO ARKAY Talladii u soo jeediye Taliyaha Ciidamada Boliska kuna soo sheegay warqadiisii ahayd lam. SEC-PO-3 ee 23-4-1973;

ISAGOO AQOONSADAY Inay labada Sarkaal ee ku qoran shaqada ka fadhiistaan bukaan iyo dà darteed.

ISAGOO DHEGEEYSTAY Ra'yigii Xoghayaha Dawladda ee Arrimaha Gudaha.

WUXUU AMRAY

Qodobka 1

- b) In Gaashaanle Dhexe Xusen Cali Axmed u ka fadhiisto shaqada caafimaadkiisa oo xumaaday awadeed.
- t) In Dhamme Maxamad Maxamud Cadow (Juni) u shadaqa ka fadhiisto isagoo da'dii shaqada u ka fadhiisan lahaa gaaray caafimaadkiisana xumaaday xagga aragga.

Saraakiisha halka sare ku qoran waxay shaqada ka fadhiisanaayaan marka laga bilaabo 1-5-1973.

Qodobka 2

Saraakiishaas waxay yeelanayaan wixii xaq ah oo sharciga lam. 6 ee xaqa ivo abaalgudka da'da ee Ciidamada Salabka Sida siinayo.

Qodobka 3

Xeerkan degdeg buu u dhaqan geliyaa waxaana lagu dhigi doona Faafinta Rasmiga ah.

Muqdisho, 26 Aprile 1973.

MADAAWEYNAHA
GOLAHA SARE EE KACAANKA
S. Gaas Maxamed Siyad Barre

Xoghayaha Dawladda ee Arrimaha Gudaha
Kusime Sareeye Gass Moxamed Siyad Barre

VISTO e registrato - Reg. n. 2, foglio n. 38.
Mogadiscio, li 30 Aprile 1973.
Il Magistrato ai Conti:
Magg. ABDULLAHI WARSAME NUR

GUDDOONSHAHA GOLAHA SARE EE KACAANKA

3 Maggio 1973, L. 50.

Xidhmo dhireed oo joogta ha.

GUDDOONSHAHA
GOLAHA SARE EE KACAANKA

ISAGA OO ARKAY Qodobka 51 ee sharciga lambarkiisu yahay 15 ee 25 Jannayo, 1969.

ISAGA OO DHEGEYSTEY Ogolaashihii Golaha Sare ee Kacaanka.
SOO JEEDINTII Xoghayaha Warasaadda Xoolaha , Dhirta iyo
Daaqa.

ISAGA OO TIX GELINAYAHA Dhowrtiinka, badbaadinta iyo dhaqaaleynta dhulka, dhirta iyo ugaarta.

WUXUU XEERAYAA

Qodobka 1

Waxaan gudoominayaa in dhulkan xadkiisu (boundaries) hoos ku qoran yahay in laga dhigay xidhmo dhireed oo joogta ah (Permanent Forest Reserve).

XADKA GACANLIBAX

Marka laga bilaabo Shiisha-Erginta, Beeraha afkooda laga soo wareegiyo, dabadeeto laga dhaco wadada Bokh iyo Iskudar qabata lana sii maro Dhicir, Carroweyne iyo Bokh, dabadeeto lagu leexdo Wadiiqada Segiig, hoos loo raaco ilamaa Laagga hoose la gaadho oo markaa la joogo Halfoofta, loo leexdo xagga Galbeedka oo Laaga Uun dushiisa la raaco lana sii maro Meedho, Qudhac, Dhagaxdheer, Karin Camud, dabadeeto loo leexdo xagga Koonfur-Bari oo buurta afkeeda laga soo wareego lana sii maro Qabuuraley, Coboldheer, Kabcun ilamaa lagu dhaco Waddada Gacanlibax; marka waddada xagga koonfureed loo raaco ilamaa waddada weyn ee Burco iyo Hargeysa lagu dhaco, dabadeeto waddada Burco loo raaco ilamaa halkii laga bilaabay ee Shiisha-Erginta.

Qodobka 2

Sharciganu wuxuu dhaqan gelayaa marka uu ku soo boxo Faalinta Rasmiga ah ee Dawladda.

MADAXWEYNAHA

GOLAHA SARE EE KACAANKA

Jaallee Sareeye Gaas Maxamed Siyad Barre

Jaallee Gaashaanle Cusman Maxamed Jelle

(ka tirsan G. S. K.)

Xoghayaha

Wasaaradda Xoolaha, Dirta iyo Daaqa

XEER WASAARADA GARSOORKA IYO DIINTA

26 Aprile 1973, L. 51.

Magacaabid (Asasoorayaasha) Max. Corte Assise, ee Gobolka Waqoyi Bari Burco, Sannadkan 1973.

XOGHAYAHA DAWLADDA

ANNAGOO ARAGNAY Warqaddii kowaad ee Kacaanka;
ANNAGOO ARAGNAY Xeerkaa soo baxay 21kii Oktobar 1969,
lambar 1;

ANNAGOO ARAGNAY Xeerkaa soo baxay 3dii Juun 1962, lambar
14, ee Nidaamka Dawladda iyo Beddelaatkaa ka dambeeyey;

ANNAGOO ARAGNAY Qodobka 26, faqrada Kowaad, ee Dekreetadii Tashriiciga Ahayd 12 Juun 1962, L. 3, ee Nidaamka Qadaha.

K E E R

Qodobka 1

Jaallayaasha ay-nu hoos kusoo sheegi doon-no, waxaa loo magacaabay inay noqdaan «Asasoorayaasha» Max. (Corte Assise) ee Gobolka Waqooyi Bari, Burco, sannadkan 1973:

1. Xirsi Samatar
2. Farax Aden
3. Cali Mahyub
4. Khadra Cabdi Axmed
5. Aden Maxamed Cali
6. Maxamed Dahir Hoorri
7. Cabdiraxman Xaji Maxamud
8. Cuman Xasan
9. Maxamed Barre Cali
10. Maxamed Xasan Cumar
11. Xaxan Ismail Maxamed
12. Bashir Xasan
13. Maxamed Cabdulla
14. Dr. Yusuf Musa
15. Abukar Cali Maxamed
16. Sacid Kaalinle
17. Cwal Garad
18. Axmed Jamac Shar
19. Farax Cali
20. Cumar Aden
21. Aden Cali Sheekh
22. Axmed Jamac Cabdi
23. Caydid Maxamed Cadoow
24. Axmed Maalim Qasim
25. Cabdi Cumar Xusen
26. Heybe Xusen
27. Cabdi Cabdillahi
28. Cumar Xusen

Qodobka 2

Dekreetadani waxay ka billaaaban hadda.
Muqdisho, 26 Aprile 1973.

Jaalle, Dr. Cabdisalam Sheekh Xusen
Xoghayaha Dawladda
Wasaaradda Garsoorka iyo Diinta

VISTO e registrato - Reg. n.2, foglio n. 33.
Mogadiscio, 30 Aprile 1973.
Il Magistrato ai Conti:
Magg. ABDULLAHI WARSAME NUR

BOGGA SEDDEXAAD

TALOOPYIN, ISGARSIIN, OGEYSIIS, IYO WAXII LA MID AH

WASAARADDA HAWLAHA GUUD

N A A D A D H U L

Waxaa la caddeynayaa in Jaalle Cali Xaji Nur iyo Moxamed Xaji Nur, u usoo qortay arji qaybta Dhismaha iyo Dhulka 5 Aprile 1973, uu ku weydiisanayey dhul dhismo dowladeed kuna yaal Muqdisho xafadda Madina, oo leh qiyaas L (el) 40; 40; 20 iyo, 20, kuna fadhiya 1200 mdh.

Soohdin: Waqooyi Jid; Koofur Jid; Galbeed Faduma Yusuf iyo Jid; Bari Maryan iyo Xawa.

Qofkii dannaynayaa wuxu si fiican uga arki naqshadda dhulka oo taal Qaybta Dhismaha iyo Dhulka ee Wasaaradda Hawlaha Guud, dhulka waxaa laga doodi karaa muddo ku siman 30 (soddon) maalmood, ee laga bilaabo maantii lugu naadshey buuga xeerka dawladda.
Muqdisho, 7 Maggio 1973.

Maamulaha Qaybta Dhismaha iyo Dhulka

WASAARADDA HAWLAHA GUUD

N A A D A D H U L

Waxaa la caddeynayaa in Jaalle Cabduraxman Cusman Axmed, u usoo qortay arji qaybta Dhismaha iyo Dhulka 17 Aprile 1973, uu ku weydiisanayey dhul dhismo dowladeed kuna yaal Muqdisho xafadda, oo leh qiyaas 4 gxs isle'eg (27x27), kuna fadhiya 729 Howl Wadag mdh.
Soohdin: Waqooyj Jid; Koofur Jid; Galbeed Jid; Bari Jid.

Qofkii dannaynayaa wuxu si fiican uga arki naqshadda dhulka oo taal Qaybta Dhismaha iyo Dhulka ee Wasaaradda Wawlaha Guud, dhulka waxaa laga doodi karaa muddo ku siman 30 (soddon) maaalmood, ee laga bilaabo maantii lugu naadshey buuga xeerka dawladda.
Muqdisho, 7 Maggio 1973.

(L. 54)

Maamulaha Qaybta Dhismaha iyo Dhulka
Moxamed Cabdi Sacid

WASAARADDA HAWLAHA GUUD

N A A D A D H U L

Waxaa la caddeynayaa in Jaalle Zahara Muse Aden, u usoo qortay arji qaybta Dhismaha iyo Dhulka 2-10-1972, uu ku weydiisanayey dhul dhismo dowladeed kuna yaal Muqdisho xafadda Valle Nord, oo leh qiyaas rektangular (27x13,50), kuna fadhiya 364,50 mdh.

Soohdin: Waqooyi Aden Botan iyo Cabdurahman Farax; Koofur Jid; Galbeed Jid; Bari Jid.

Qofkii dannaynayaa wuxu si fiican uga arki naqshadda dhulka oo taal Qaybta Dhismaha iyo Dhulka ee Wasaaradda Wawlaha Guud, dhulkaa waxaa laga doodi karaa muddo ku siman 30 (soddon) maaalmood, ee laga bilaabo maantii lugu naadshey buuga xeerka dawladda.

Muqdisho, 10 Maggio 1973.

Maamulaha Qaybta Dhismaha iyo Dhulka

(L. 55)

Moxamed Cabdi Sacid

WASAARADDA HAWLAHA GUUD

Baddalaad naado dhul uu leeyahay Jaalle Moxamed Cumar Mohidin, ku yaal Muqdisho xafadda Walle Nord T. G. 645-64

Jaallaha kor ku magacaaban, oo horay loo naadshay dhul ku fadhiya 405 mdh., ee laguna soo diray warqada tiradeeda tahay BF-645-2337 tari-khadeeduna tahay 24 Agisto 1967, waxaa la caddeynayaa in dhulka isaga ah waxuu dhan yahay 27x12,50 la mid ah 337,50 ee ayaan ahayn sidaa hore ee kor ku dhigan.

Muqdisho, 10 Maggio 1973.

Maamulaha Qaybta Dhismaha iyo Dhulka

(L. 56)

Moxamed Cabdi Sacid

DEGMADA BARDHERE

NAADO KU SAABSAN DHUL

Waxaa loo sheegayaa dhammaanba dadka Deggan magaalada Bardhere in aanu soo dhejinay digniinkaas oo ku saabsan dhul uu deggaan doono 30 (soddon) casho oo laga billari doono bishan Socota 21-2-1973 ilaa 23-3-1973, dhulkaas oo uu ina soo weydiistay ninka la yiraahdo carta Maxamed Aden oo deggan magaaladan Bardhere.

Jaallahaas wuxuu u soo dhigtay arji in un dego dhulkaas ku yaal magaalada Bardhere xafadda «Hillaac» taasoo ay idiin caddeyneeyso tu-saalayskeeda planimetria oo yaal Xafiiska Guddomiyaha Guddiga degmada Bardhere.

Saas daraadeed dadka ay dani ugu jirto waxaa loo sheegayaa in ay war faahfaahin ka heli karaan Xafiiska Guddomiyaha degmada Bardhere intaanay dhammaan 30ka casho oo ay digniinta deggan tahay.

Bardhere, 20 Febrayo 1973.

(L. 57)

Gudomiyaha Kumeelgarka Degmada Bardhere
Waxaa saxiixay K. Seddaxaad Cise X. Cabdi
